



# OSSEO AREA SCHOOLS

## HAGAHA MACLUUMAADKA

Ka dhex raadso iskuulka aad rabto Osseo Area Schools

- Fursadaha iskuulada Takhasuska iyo Online ka Adeegyada
- Waxbarashada Gaarka ah
- Barnaamijyada U-diyaarsanaanta Jaamacada
- Barnaamijyada tacliinta farsamada iyo Xirfadaha
- Horumarinta Hogaanka Ardayga
- Hawlaha kala duwan ee Manhajka ka baxsan sida ciyaaraha
- Bulsho taageero leh



OSSEO AREA SCHOOLS

ISD 279

# Ka dhex raadso iskuulka aad rabto Osseo Area Schools

## Riyood. Baadh. Baro.

Osseo Area Schools waxay siisaa khibrad waxbarasho oo aan caadi aheyn qiyaastii 21,000 oo arday, laga bilaabo xanaanada hore ilaa koritaan buuxa. Ardaydu waxay ku koraan oo ku hore maraan fursado fiican, taageero waxtar leh iyo iskaashiyo bulsho oo xoog leh taasoo dhiirigelisa waxbarasho qofka noloshiisa oo dhan.

## Table of contents

**Pg. 3** Gaadiidka baska Iskuulka

**Pg. 4** Barnaamijyada Dhalaanka yar yar

**Pg. 5** Iskuulada Hoose

**Pg. 6** Iskuulada Dhexe

**Pg. 7** Iskuulada Sare

**Pg. 8** Iskuulada Takhasuska iyo noocyada loo maro

**Pg. 9** Waxbarashada fasalka banaankiisa iyo Adeegyada caawinta

**Pg. 10** Waxbarashada Bulshada

**Pg. 11** Dhisid Mustaqbal wanaagsan

**Pg. 12** Diyaar ma u tahay inaad is-qorto



## Baadh fursadaha Iskuulkaaga ee kuu furan

**1**

### Tixgeli Baahiyahaaga

Eeg in iskuuladu ay bixiyaan adeegyada aad u baahan tahay iyo in basas loo heli karo. Baadh sida iskuulada iyo barnaamijyada takhasusku ay uga wareegaan iskuul hoose ilaa iskuul sare. Maskaxda ku hay, iskuulada qaarkood ayaa u xiran is-qorista furan (open enrollment) iyo u kala wareegista degmada dhexdeeda.

**2**

### Ka firso fursadahaaga

Booqo [district279.org/find-my-school](http://district279.org/find-my-school) oo geli ciwaanka gurigaaga meesha baarista si aad u xaqijiso aaga iskuulka oo ka firso fursadaha iskuulkaaga ee kuu furan.

**3**

### Booqo fursadaha Iskuulkaaga

Wax badan ka ogow iskuulada adiga ku xiiso geliya addo samaysanaya booqasho iskuul ama aad soo aragto. Booqo bogga internetka ee iskuulka doorashada ah ama toos ula xiriir iskuulka si aad u samaysato qorshe booqasho iskuul.

**4**

### Bilow nidaamka diiwaangelinta

Gal bogga 12 si aad u hesho macluumaad codsi oo muhiim iyo faahfaahin ku saabsan sida laysu diiwaangelinayo.

## Yey tahay inay codsadaan?

### Codsi baa loo baahan yahay haddii:

- Ilmahaagu hadda dhigto Osseo Area Schools oo u rabo iskuul kale
- Ilmahaagu ku cusub yahay Osseo Area Schools
- Aad rabto inaad qorto ilmahaaga iskuul/barnaamij takhasus leh (magnet)

### Badanaa codsi cusub lagama rabo ardayda kuwaas oo:

- Sii wadanaya iskuulkooda ay hadda dhigtaan ama fasalka kan xiga ee barnaamij takhasus
- Hadda deegaan qoran kuna jira xuduudaha degmada Osseo Area Schools gelyayana fasalka lixaad ama fasalka sagaalaad oo raacaya wadadoodii diiwaangelinta caadiga ahayd

Wixii xog dheeri ah [booqo.district279.org/enroll](http://booqo.district279.org/enroll).



# Gaadiidka Baska Iskuulka

Waxay bixiyaan gaadiid ammaan ah oo la isku haleyn karo si ay ardaydu iskuulka u tagaan iyagoo u diyaarsan inay wax bartaan oo ay gaaraan himilooyinkooda.

Osseo Area Schools waxaa ka go'an inay bixiyaan gaadiid ammaan ah oo wax ku ool ah oo loogu tala galay ardeyda xaqa u leh. Degmadu waxay u fidisaa adeeg bas oo la isku hallayn karo oo loogu talogalay dadka buuxiya shuruudaha fogaanshaha, si loo hubiyo in ardaydu ay si fudud u aadan ugana soo noqdaan iskuulka.

Qoysasku waxay heli karaan agab muhiim ah sida goobaha joogsiga basaska iyo app-ka raadraaca waqtiga dhabta ah si loola socodsiyo gaadiidka caruurtooda. Hoos waxaa ku qoran qodobo muhiim ah oo ku saabsan adeegyada gaadiidka ee ay ardaydu ka heli karaan Osseo Areas Schools.

- **U qalmida:** Ardeyda waxay xaq u leeyihii inay raacaan gaadiidka basaska hadii ay ku noolyihii meel u jirta 0.8 mile ama wax ka badan iskuulka hoose (elementary) ama ay ku noolyihii hal mayl ama wax ka badan iskuulka (dugsiga dhexe iyo hugsiga sare) marka laga qiyaaso meesha ay degan yihiin. Qoysasku waxay isticmaali karaan aaladda "Find My School" si ay u ogadaan iskuulka loo asteeyey iyo fursadaha gaadiidka.
- **Joogsiga basaska:** Waqtiyada gaarka ah ee qaadista iyo keenista ayaa laga heli karaa iyadoo la adeegsanayo aaladaha ay bixisay dagmadu, sida ParentVUE iyo appka raadraaca basaska ee FirstView.
- **La socodka baska:** App-ka FirstView ga wuxuu qoysaska ka caawiyaa inay la socdaan goobaha basaska xilliga dhabta ah, taasoo sahli karta walaaca ku saabsan jadwalka basaska isla markaana hubin karta isgaarsiin fiican xilliga dib u dhaca.

Maadaama ay jiraan tilmaamo cad oo ku saabsan xaq u yeelashada iyo qalabka si sahan loo isticmaali karo ee lagu raadraaco wadooyinka basaska, qoysasku si habسامي ah bay u maareeyaan gaadiidka. Haddii ay go'aamiyaan u-qalmitaanka ama la socoshada baska cunuggaaga, Osseo Area Schools waxay hubisaa hanaan fudud oo hufan dhammaan dadka oo dhan.

## Transportation Office

763-391-7244  
BusQuestions@district279.org

## Office Hours

School in session: 6 a.m. to 5 p.m.  
Non-student days: 6 a.m. to 4:30 p.m.

## Learn more



[district279.org/transportation](http://district279.org/transportation)

# Barnaamijyada Dhalaanka yar yar

Dhisida asaaska waxbarashada nolosha oo dhan

TBarnaamijka dhalaanka yar yar ee Osseo Area Schools wuxuu bixiyaa fasalo tayo sare leh, koriimo ahaan ku haboon iyo fursado ay siiso dhammaan caruurta yar yar iyo qoysaskooda. Shaqaalaha dhalaanka yar yar waxaa ka go'an inay bixiyaan jawi nabdoon oo kor u qaada kor u qaada korriinka jirka, bulshada, dareenka, bilicdinta, garaadka iyo luqadda ee ilmo kasta- iyada oo tixgelinaysa baahiyaha gaarka ah iyo rabitaanka qoysaska.

Wixii dheeri ah booqo [district279.org/early-childhood](http://district279.org/early-childhood).



## Waxbarashada Qoyska iyo Dhalaanka yar yar (ECFE)

Waxbarashada Qoyska iyo Dhalaanka yar yar (ECFE) waxay ka caawisaa dejinta aasaas-nololeedka waxbarashada oo dhan. Inta badan fasalada waxaa ka mid ah waqtii loogu talagalay in caruurta iyo qoysaska ay wada koraan oo ay wax wada bartaan, iyo sidoo kale waqtii ay caruurta ka qayb galaan waxbarasho madaxbanaan iyada oo waalidiinta / xannaaneeyayaashu ay sahamiyaan aragtida iyo khayraadka ay ka helaan barayaasha ruqsadda leh.

## Waxbarashada Gaarka ah ee Dhalaanka (ECSE)

Waxbarashada gaarka ah ee dhalaanka (ECSE) waxay siisaa fursado korimo iyo taageero caruurta iyo qoysaskooda. Caruurta laga bilaabo dhalashada ilaa 5 sano jir ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka waxay heli karaan adeegyo waxbarasho oo gaar ah.

**Preschool, PreK, Maalin-Badhkeed, Prekindergarten maalinkasta iyo Four Star Express**  
Osseo Area Schools waxey bixiyaan dugsi xanaano khidmad ku saleysan iyo barnaamijyada Xanaanada ka hor ee lacag la'aanta ah iyo kuwa lacagta ah ee loogu talagalay caruurta da'doodu u dhexeyso seddex ilaa shan jir. Fursadahan waxbarasho ee hore waxay ardayda ka caawiyaan inay dhisaan aasaas xoog leh oo ay ku bartaan waxbarashada nolosha oo dhan.

## Baaritaanka Caruurta yar yar

Baadhitaanka Carruurnimada Hore waa adeeg lacag la'an ah oo loogu talagalay caruurta da'doodu u dhexayso sadex ilaa shan jir. Waxay qiimaysaa koriimada meelaha ay ka midka yihiin aragga, maqalka, hadalka, xirfadaha dhaqdhaqaqa faraha iyo koboca bulsho-dareenka, iyada oo gacan ka geysanaysa in la ogaado baahi kasta goor hore ee safarka waxbarashada. Talaabadan muhiimka ah waxay u diyaarisaa caruurta bilawga guusha ee iskuulada xannaanadda.



Ka samayso balan baaritaan online ah  
[osseo.ce.eleyo.com](http://osseo.ce.eleyo.com)

# Dugsiga Hoose (Elementary)

Taageerid Daryeel si ilmahaaga looga caawiyo inuu ka koro dhanka waxbarasho iyo bulshadaba

Barnaamijyada dugsiyada hoose ee Osseo Area Schools waxay bixiyaan aasaas waxbarasho xoogan, iyada oo loo marayo waxbarasho qof ahaaneed iyo tacliin heer sare ah. Iskuuladu waxay bixiyaan adeegyo ay ka mid yihiin waxbarashada khaaska ah iyo barnaamjyo dadka hiboda leh, oo ay weheliyaan hawlo kala duwan oo ka baxsan manhajka sida ciyaaraha, farshaxanka iyo naadiyada. Bulsho soo dhowayn leh waxay qiimaysaa kala duwanaanshaha iyo ka qayb-galka qoyska, kobcinta jawi ammaan ah oo loo wada dhan yahay. Wixii macluumaad dheeraad ah ka fiiri [district279.org/elementary](http://district279.org/elementary).

## Iskuulada ku yaal aagaaga



### Basswood Elementary School

15425 Bass Lake Rd., Maple Grove, MN 55311  
763-494-3858 | [bw.district279.org](http://bw.district279.org)



### Cedar Island Elementary School

6777 Hemlock Ln., Maple Grove, MN 55369  
763-425-5855 | [ci.district279.org](http://ci.district279.org)



### Edinbrook Elementary School

8925 Zane Ave. N, Brooklyn Park, MN 55443  
763-493-4737 | [eb.district279.org](http://eb.district279.org)



### Elm Creek Elementary School

9830 Revere Ln. N, Maple Grove, MN 55369  
763-425-0577 | [ec.district279.org](http://ec.district279.org)



### Fair Oaks Elementary School

5600 65th Ave. N, Brooklyn Park, MN 55429  
763-533-2246 | [fo.district279.org](http://fo.district279.org)



### Fernbrook Elementary School

9661 Fernbrook Ln., Maple Grove, MN 55369  
763-420-8888 | [fb.district279.org](http://fb.district279.org)



### Garden City Elementary School

3501 65th Ave. N, Brooklyn Center, MN 55429  
763-561-9768 | [gc.district279.org](http://gc.district279.org)



### Oak View Elementary School

6710 E. Fish Lake Rd., Maple Grove, MN 55369  
763-425-1881 | [oak.district279.org](http://oak.district279.org)



### Palmer Lake Elementary School

7300 W. Palmer Lake Dr., Brooklyn Park, MN 55429  
763-561-1930 | [pl.district279.org](http://pl.district279.org)



### Park Brook Elementary School

7400 Hampshire Ave. N, Brooklyn Park, MN 55428  
763-561-6870 | [pb.district279.org](http://pb.district279.org)



### Rice Lake Elementary School

13755 89th Ave. N, Maple Grove, MN 55369  
763-420-4220 | [rl.district279.org](http://rl.district279.org)



### Rush Creek Elementary School

18801 County Rd. 101, Maple Grove, MN 55311  
763-494-4549 | [rc.district279.org](http://rc.district279.org)



### Woodland Elementary School

4501 Oak Grove Pkwy., Brooklyn Park, MN 55443  
763-315-6400 | [wd.district279.org](http://wd.district279.org)

\*Booqo Webka Iskuulka aad rabto si aad u samaysato booqasho

## Haynta ilmaha ee iskuulka ka hor iyo ka dib



### Haynta caruurta da'da iskuulka ee Kidstop (Kindergarten ilaa fasalka shanaad)



Haynta caruurta da'da iskuulka ee Kidstop, oo ay bixiyaan Waxbarashada Bulshada ee Osseo Areas Schools, waxay bixisaa jawi xiiso leh oo taageero u ah xanaanada ilaa fasalka shanaad ee iskuulka ka hor iyo ka dib. Barnaamjika waxaa ku jira ciyaaro rabitaan ku saleysan, oo u oggolaanaya carruurta inay ka qayb galaan fursado waxbarasho oo wax ku ool ah oo kala duwan oo la mid ah danahooda.

Wixii dheeraad ah ka eeg  
[kidstop279.org](http://kidstop279.org)

## Iskuulada Takhasuska



### Birch Grove School for the Arts

4690 Brookdale Dr., Brooklyn Park, MN 55443  
763-561-1374 | [bg.district279.org](http://bg.district279.org)



### Weaver Lake: A Science, Math & Technology School

15900 Weaver Lake Rd., Maple Grove, MN 55311  
763-420-3337 | [wvr.district279.org](http://wvr.district279.org)



### Zanewood Community: A STEAM School

7000 Zane Ave N, Brooklyn Park, MN 55429  
763-561-9077 | [zw.district279.org](http://zw.district279.org)

## Iskuulada Online



### 279Online

763-315-6400 | [279online.com](http://279online.com)



## Fursadaha Sahaminta



Osseo Area Schools waxay siisaa fursado sahamineed oo kala duwan oo loogu talagalay ardayda dugsiyada dhexe si ay u ogaadaan danahooda, kartidooda iyo in la xoojiyo ardayda si ay uga faa'idaystaan lahaanshaha waxbarashadooda una diyaariyan fursado waxbarasho oo mustaqbalka ah.

- Koorsooyinka aan khsab ahayn:** Ardaydu waxay dooran karaan koorsooyinka aan Khasab ahayn sida luqadaha adduunka, farshaxanka muuqaalka ah, muusikada iyo tiknoolajiyadda, oo ku dhiiriya hal-abuurka iyo codkarnimo.
- Sahaminta STEM:** Koorsooyinka robotics, koodh-siinta injineernimada waxay ardayda siyyaan ka qayb qaodashada hawlaha baraatiykoda ah ee STEM si ay horumariyaan xirfadaha xalinta mushkiladaha.
- Baaritaanka Xirfadaha:** Barnaamijyada waxay baraan ardayda xirfadaha kala duwan, iyaga oo ka caawinaya inay fahmaan wadiiqooyinka xirfaadeed ee suurtagalka ah iyo xirfadaha lagama maarmaanka ah.
- Farshaxanka hal abuurka:** Fursadaha masraxa, music iyo farshaxanka muuqaal wuxuu u oggolaadaan ardayda si ay u soo bandhigaan karti ay ku dhisan kalsooni.
- Waxbarasho Baraatiko ah:** Tijaabinta barashada iyadoo loo marayo mashaariic iyo hawlaha iskaashiga waxay dheeraysaa fahamka iyo kobciya jacaylka barashada.

Dheeri ka baro [district279.org/middle-school](http://district279.org/middle-school).

# Dugsiyada Dhexe

## Koboc shaksiyadeed iyo mid tacliimeed lagu gaarayo waxbarasho toos ah

Dugsiyada dhexe ee Osseo Area Schools waxay bixiyaan jawi taageero leh oo diiradda lagu saarayo guusha waxbarasho iyo kobaca shaqsiyed. Ardayda waxaa loogu yeeraa sameeyaan maadooyinka asaasiga ah, koorsooyinka ad adag iyo adeegyada khaaska ah iyagoo sidoo kalena sahaminaya maadooyinka ka baxsan manhajka sida muusikada, farshaxanka iyo naadiyada. Tani waxay ka caawisaa in ay horumariyaan madaxbannaani iyo xirfado hogamineed, kuwaas oo u diyaarinaya dugsiga sare iyo wixii ka danbeeyaba.

Learn more about middle school [atdistrict279.org/middle-school](http://atdistrict279.org/middle-school).

## Iskuulada ku yaal aagaaga



### Maple Grove Middle School

17000 Hemlock Ln., Maple Grove, MN 55369  
763-315-7600 | [mgms.district279.org](http://mgms.district279.org)



### North View Middle School

5869 69th Ave. N, Brooklyn Park, MN 55429  
763-585-7200 | [nvms.district279.org](http://nvms.district279.org)



### Osseo Middle School

10223 93rd Ave. N, Osseo, MN 55369  
763-391-8800 | [oms.district279.org](http://oms.district279.org)

## Magnet school



### Brooklyn Middle STEAM School

7377 Noble Ave. N, Brooklyn Park MN, 55443  
763-569-7700 | [bms.district279.org](http://bms.district279.org)

## Online school



### 279Online

763-315-6400 | [279online.com](http://279online.com)

\*Booqo Webka Iskuulka aad rabto si aad u samaysato booqasho.

# Dugsiga Sare

## Sahami, kor oo u diyaar garow nolosha dugsiga sare kadib

Dugsiyada sare ee Osseo Area Schools waxay bixiyaan waxbarasho isku dheeli tiran oo diiradda lagu saarayo tacliinta iyo koboc shaqsiyeed. Ardaydu waxay qaadan karaan koorsooyinka (AP) iyo koorsooyinka u diyaargarowga kulliyadaha waxayna ku biiri karaan hawlaha kabaxsan manhajka sida ciyaaraha, muusikada, farshaxanka iyo naadiyada si ay u horumariyaan xirfadaha shaqooyinka iyo hogaaminta. Iyaga oo heli karo tiknoolajiyad heer sare ah iyo adeegyo, waxay diyaar u yihiin guul xirfadeed iyo mustaqbal waxbarasho.

Ka hel dhamaan fursadaha dugsiyada sare halkan [District279.org/senior-high](http://District279.org/senior-high).



## Iskuulada ku yaal agtaada



**Maple Grove Senior High School**  
9800 Fernbrook Ln. N, Maple Grove, MN 55369  
763-391-8700 | [mgsh.district279.org](http://mgsh.district279.org)

## Magnet schools/programs



**Park Center Senior High School:  
An IB World School**  
7300 Brooklyn Blvd., Brooklyn Park, MN 55443  
763-569-7600 | [pcsh.district279.org](http://pcsh.district279.org)



**Osseo Senior High School**  
317 5th St. NW, Osseo, MN, 55369  
763-391-8500 | [osh.district279.org](http://osh.district279.org)

## Alternative learning school



**Osseo Area Learning Center**  
7300 Boone Ave. N, Brooklyn Park, MN 55428  
763-391-8890 | [oalc.district279.org](http://oalc.district279.org)

## Online school



**279Online**  
763-315-6400 | [279online.com](http://279online.com)

\*Booqo Webka Iskuulka aad rabto si aad u samaysato booqasho.

## Barnaamijyada u diyaargarowga jaamacada iyo xirfada

Osseo Area Schools waxay bixiyaan barnaamijyo kala duwan oo ku saabsan u diyaargarowga jaamacadaha iyo xirfadaha si ay u diyaariyaan ardayda iyagoo leh xirfado iyo waayo-aragnimooyin si ay mustaqbalka u gaaraan guul.

- **Advanced Placement (AP):** Waa koorsooyinka heer jaamacadeed ah oo ay suurtagal tahay in lagu helo dhibcaha jaamacada.
- **Post-Secondary Enrollment Options (PSEO):** Waa ardayda u qalma waxay dhigan karaan koorsooyin heer jaamacadeed oo ay ku helayaa dhibcaha iskuulka sare iyo kuwa jaamacadaha.
- **Career & Technical Education (CTE):** Waa koorsooyin baraaktiko ah ee oo ku saabsan shaqooyinka aad loogu baahan yahay sida daryeelka caafimaadka, IT-da iyo ganacsiga.
- **International Baccalaureate (IB):** Waa barnaamij waxbarasho dhamaystiran oo ay aqoonsan yihiin jaamacadaha caalamka oo dhan.
- **Career pathways and work-based learning:** Waa fursadaha khibrad shaqo, shahaadooyin iyo waayo-aragnimo shaqo.
- **College and career counseling:** Taageerada qofeed ee codsiyada kulliyadaha, deeqaha waxbarasho iyo qorshaynta xirfadda.

Booqo: visiting [district279.org/senior-high](http://district279.org/senior-high).

# Iskuulada Takhasuska (Magnet) iyo laamaha kale

Osseo Area Schools waxay bixiyaan barnaamijyo takhasus (magnet) oo khaas ah, oo loogu talagalay in lagu kiciyo xiisaha laguna horemariyo kartida ardayga laga bilaabo dugsiga hoose ilaa dugsiga sare. Iskuulkasta oo magnet ah wuxuu bixiyaa safar waxbarasho oo u gaar ah looguna talo galay rabitaanka shaqsi, iyadoo la hubinayo in ardayda koraan marka ay sahaminayaan waxa ay jecel yihiin.

## Iskuulada Hoose (Elementary): Dhisis Asaas Adag

- **Weaver Lake: A Science, Math & Technology School**
  - Ku soo biir dunida STEM (sayniska, teknoolojiyada, injineernimada iyo xisaabta) oo ay weheliso waayo-aragnimo baraktiko ah taas oo dhalisa baaritaan iyo in kor loogu qaado xirfadaha xalinta mushkiladaha.
- **Birch Grove School for the Arts**
  - Hal-abuurkaaga ku soo dar jawi meel ay aragtida farshaxanku ku korto. Ardaydu waxay kor u qadaan xirfadahooda waxbarasho iyagoo sahaminaya fanka, oo ka dhigaya barashada mid firfircoon oo ka qeybal leh.
- **Zanewood Community: A STEAM School**
  - Ku soo dhowow hab isku dhafan oo isu keena sayniska, teknoolojiyada, injineernimada, fanka iyo xisaabta. Waxbarasho ku salaysan mashruuca iskaashiga ayaar ardayda ku qalabeysa oo siisa xirfadaha lagama maarmaanka ah ee qarniga 21aad, iyagoo u diyaarinaya ardayda guusha mustaqbalka.

## Iskuulada Dhexe: Kordhinta aqoonta

- **Brooklyn Middle STEAM School**
  - Si fudud ugu soo wareeg dugsiga dhexe, halkaas oo farshaxanka iyo STEM ay ku kulmaan! Ka qaybal mashaariic fekrado cusub iyo iskaashi leh kuwaas ku adag ardayda si ay u xalliyaaan mushkiladaha dhabta ah ee dunida si hal abuur leh.

## Iskuulada Sare: U diyaarinta Ardayda Mustaqbalka

- **Osseo Senior High School: Barnaamij Takhasus caafimaad**
  - Wax ka ogow xirfadaha daryeelka caafimaadka oo leh waayo-aragnimo baraktiko leh taas oo dhista xirfadaha asaasiga ah ee sayniska caafimaadka, una diyaarisa ardayda barashada mustaqbalka ee caafimaadka.
- **Park Center Senior High School: An IB World School**
  - Maadaama ay ardaydu galayaan dugsiga sare, waxay ku biiri karaan barnaamijka qiiimaha leh ee caalamiga ah ee heerka sare (IB). Koorsadan waxbarasho ee dhamaystiran waxay horumarisaa fikirka muhiimka ah iyo wacyi caalami ah, iyagoo ka caawinaya ardayda inay ku guuleystaan waxbarashada sare iyo wixii ka sii baxsan.

Halkan wax badan ka ogow [district279.org/magnet-schools](http://district279.org/magnet-schools).

# Barashada Farsamada iyo Xirfadaha

Osseo Area Schools waxay bixiyaan Barnaamij Waxbarasho Farsamo iyo Xirfad (CTE) aad u wanaagsan kaasoo ka caawiya ardayda inay helaan xirfado muhiim u ah xirfadaha kala duwan. Iyada oo diiradda la saarayo barashada farsamada gacanta , ardayda waxay sahamiyaan maadooyinka ganacsiga, cilmiga caafimaadka, teknoolojiyada macluumaadka iyo xirfadaha ganacsiga. Waxay ka qaybgalaan fasalada, la shaqeeyaan ganacsiyada maxalliga ah oo dhameystiraan shaqo barasho (internships), shaqystaan dhibco koleej iyo shahaadooyin inta ay jidka ku jiraan. Barnaamijkani wuxuu ardayda u diyaariyaa shaqooyinka wuxuuna u dhisaa xirfado mustaqbalkooda.

Dheeho oo booqo halkan: [district279.org/career-technical-education](http://district279.org/career-technical-education).



# Tacliinta Fasalka ka baxsan



Osseo Area waxey heegan u yihiin inay arday walba siyaan fursad ay ku guuleystaan. Iyagoo wata aqoon xoogan, ka qayb galaya hawlo ka baxsan manhajka iyo weliba bulsho soo dhawayn leh, hadafka degmada waa inay taageerto dhamaan ardayda iyo qoysaska markay wax baranayaan ee korayaan.

## Tacliin heer sare ah iyo adeegyo taageero

Tacliin heer sare ah iyo adeegyo kala duwan oo taageero ayaa diyaar u ah arday kasta, sida latalinta, waxbarashada gaarka ah iyo barnaamijyada loogu talagalay ardayda hibada dheer leh. Maadaamaa heerka qalinjebintu aad u sarayso, Osseo Area Schools waxaa ka go'an inay ardayda u diyaariyaan xirfadaha iyo jaamacadaha. Sidoo kale ardaydu waxay heli karaan hawlo kabaxsan manhajka , kuwaas oo kobciya xirfadaha ka baxsan fasalka gudiiisa.

## Fursadaha Ka baxsan Manhajka

Hawlo badan oo kala duwan ayaa u ogolaanaya ardayda inay ka qayb qaataan fasallada banaanka, sida isboortiga, barnaamijyada fanka iyo naadiyada heer fasa kasta. Hawlahani waxay dhiirigeliyan hoggaanka, wada-shaqaynta kooxeed iyo koboca shakhsiyeed, taas oo ardayda ka caawinaysa in ay qiimeeyaan waxa ay jecel yihiin.

## Kala duwanaanta iyo Bulshada

Osseo Area Schools waxay ku faanaan deegaanada loo dhan yahay. Matalaadda dhaqamada kala gedisan, iskuul walba wuxuu hubiyya in arday kastaa uu dareemo soo dhaweyn. Qoysaska iyo bulshada waxaa lagu dhiirigelinaya inay ka qayb qaataan xafladaha dhaqamada iyo fursadaha iskaa wax u qabso, idhisidda xiriirada xoogan ee ka dhexeeyaa guriga iyo iskuulka.

Osseo Area Schools waxaa ka go'an inay ka caawiyaan ardayda sidii ay u barbaarin lahaayeen dhanka aqooneed iyo kan shaqsi ahaaneedba. Waxaa qoysaska lagu martiqaadaya inay wax badan ka ogaadaan barnaamijyada la heli karo oo ogaadaan sida degmadu u taageerto ilmo kasta waxbarashdiisa iyo mustaqbalkiisa .



## Adeegyada Taageerada Ardayga

Osseo Area Schools waxay mudnaanta siinayaan wanaagga iyo guusha ardayda. Kooxda u heelan arintan waxay iska kaashataa si loo xaqijiyo in dhammaan ardayda ay helaan adeegyada iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay u gaaraan hadafyadooda waxbarasho iyo kuwa shaqsiyadeed.

- Adeegyada talo-bixinta:** La-taliyayaasha iskuulku waxay bixiyaan taageero waxbarasho, mid bulsho iyo mid dareen, oo ku hagaya ardayda caqabadaha ku iman kara bixiyana talo jaamacadeed iyo mid xirfadeed.
- Waxbarashada gaarka ah:** kooxdeena heelan waxay isu keenaan barnaamijyada iyo adeegyada si ay u daboolaan baahiyaha gaarka ah ee ardayda naafada leh lagu siyo jawi loo dhan yahay.
- Adeegyada caafimaadka maskaxda:** Helitaanka xirfadlayaasha caafimaadka dhimirka ayaa diyaar u ah inay ardayda ka caawiyaan inay maareeyaan culeesyada iyo caqabadaha dareenka.
- Taageerada macalimo iyo caawinta layliyada:** Ardaydu waxay ka faa'iideysan karaan caawinta layliga, barnaamijyada iskuulkaka dib iyo caawinaada shaqo guriga si kor loogu qaado kalsoonida iyo waxbarashada.
- Ka qeybgalka qoyska:** Siminaaro iyo adeegyo lagu caawinayo waalidka si ay si firfircoo uga qayb qaataan waxbarashada cunugooda.



## Waxbarashada Bulshada



Barnaamijyada Waxbarashada Bulshada ee Dugsiyada Aagga Osseo Aagga waxay abuuraan fursado si wanaagsan u saamaynaya bulshada oo dhan iyada oo loo marayo barnaamijyo iyo adeegyo wax-qabasho ah oo cusub. Wax badan ka baro [ce.district279.org](http://ce.district279.org)

### Waxbarashada Qoyska iyo Barbaarinta dhalaanka (EC&FE)

Barnaamijka ECFE&FE wuxuu bixiyaa fasalada ECCE, Booqashooyinka ECCE, fasalada Preschool iyo PreK, Baaritaan hore iyo adeegyo bulsho si ay uga caawiyaan waalidiinta iyo carruurta (dhalashada ilaa shan jir) inay dhisaan aasaas xoog leh oo loogu talagalay waxbarashada nolosha oo dhan.

### Four Star Express

Four Star Express waa barnaamij xanaanada ka hor iyo daryeel loogu talagalay carruurta afar ama shan sano jir ah Sept. 1 ama ka hor. Barnaamijka waxaa la bixiyaa inta lagu jiro sanad-dugsiyedka iyo inta badan maalmaha aan iskuulka la dhigan.

### Kidstop

Kidstop waxaa barnaamijka daryeel da'da iskuulka oo ku saleysan doorashada looguna talagalay ardayda dhigata kindergartenka ilaa fasalka shanaad. Barnaamijka waxaa la bixiyaa iskuulka ka hor, iskuulka kadib iyo inta badan maalmaha aan iskuul jirin.

### Kobcinta Dhalinta - Youth Enrichment

Fasalada kobcinta dhallinyarada waxay ardaydu ka qaybgalaan iskuulka kadib, galabihii, dhammaadka usbuuca iyo xilliga xagaaga. Fasalada ardayda dugsiyada hoose iyo kuwa dhexeba waxaa ka mid ah farshaxanka, chess, STEM, luqadaha, casharka muusikada, robotics, isboortiga, tiyaatarka iyo waxyaabo kale.

### Kobcinta Dadka waaweyn - Adult Enrichment

Kobcinta dadka waaweyn bixisaa noocyoo kala duwan oo ah fasalo u gaar ah oo loogu talagalay dadka waaweyn oo leh hab la heli karo si ay u dhiirigeliyan, u tijaabiyaan waxyaabo cusub oo ay la shaqeeyaan dadka kale ee bulshada.

### Waxbarashada Dadka waaweyn - Adult Basic Education (ABE)

ABE waxay bixisaa fasalo bilaash ah oo loogu talagalay dadka waaweyn si ay u bartaan Ingiriisi, si fiican u bartaan akhriska, qorista, ama xirfadaha xisaabta, u diyaariyaan imtixaanka GED ama u helaan shahaadada dadka waaweyn. Maadaama fasalka loo dhigin karo siyaabo kala duwan, ardaydu waxay dooran karaan inay fasalada ka qeybgalaan qof ahaan ama online ahaan.

### District 279 Foundation

In ka badan 30 sano, Hay'adda District 279 Foundation, oo ah hay'ad samafal oo ah 501 (c) (3) waxay heegan u ahayd taageerida ardayda dhigata Osseo Area Schools. Wax badan ka ogow [district279foundation.org](http://district279foundation.org).

### Kirada Dhismeyaasha - Facilities Rentals

Shaqaalaha samaynta jadwalka dhismeyaasha iskuulada waxay iskuulada duba ridaan isticmaalka xarumaha degmada si qof ah, koox ama ganacsi.





# ***Building a Better Future***

## **Maalgelin goobo casriga ah si ardaydu u guuleystaan**

Osseo Area Schools waxaa ka go'an in ay abuuraan goobo casri ah, ammaan ah oo ay ka qayb galaan ardaydu si ay u barbaaraan. Iyadoo la isticmaalayo barnaamijka "Building a Better Future" ama dhisidda mustaqbal wanaagsan, ayaa degmadu waxay xoojineysaa dhismayaasha iskuulada, cusboonaysiinta teknoolojiyadda iyo xoojinta tallaabooyinka badbaadada- ayagoo dhamaantood ujeeddadu tahay guusha ardayda ee waqtiga dheer.

**Iskuulada ku yaala degmada oo dhan waxaa lagu samayn doonaa dayactir fiican, oo ay ka mid yihiin:**

- Goobo waxbarasho cusub iyo kuwa la cusbooneysiay sida xarumaha maktabadda oo dib loo qaabeeyey, fasalada banaanka iyo goobo waxbarasho siyaabo kala gedisan loo adeegsado loona isticmaalo iskaashiga, barashada ardeyda ku saabsan. Deegaanadan waxaa loogu talagalay in lagu dhiirigeliyo hal-abuurnimo, fekerada muhiimka ah oo ay ka qaybqaataan dhamaan heerraka fasalada kala duwan.
- Fasalo siyaabo kala duwan loo adeegsado oo bixin doona qaabab la bed bedalan karo oo leh agab casri ah, oo u ogolaanaya macalimiinta inay ka dhigtaan fasaladooda siday rabaan si ay u daboolaan baahiyaha kala duwan ee ardayda. Qolalkaan waxaa loogu talagalay inay taageeraan hababka kala duwan ee waxbarasho, shaqo-kooxeedyada iyo waxbarasho ku salaysan mashruuc, abuurista khibrad waxbarasho oo firfircooni oo is-dhexgal ah.
- Astaamo amni oo la xoojiyey oo looga gol leeyahay in lagu ilaaliyo ardayda iyo shaqaalaha.
- Casriyeen waxbarashada farsamo iyo xirfadaha (CTE) oo siinaysa ardayda si ay u helaan goobo casriyeysan iyo qalab la jaanqaada heerraka warshadaha. Casriyantani waxay taageeri doonaan barnaamijyo kala duwan ka bilow injineernimada iyo robotics ilaa sayniska caafimaadka iyo warbaahinta digital, iyadoo la hubinayo in ardayda qalibyaan iyagoo leh xirfadaha baraatiyo ah oo heer jaamacadeed iyo xirfad u diyaarsanaan leh.

Dhamaan dugsiyada degmada waxay heli doonaan dayactir. Mashaariicdan dhismayaasha waxaa loo dhamaystirayaa qeybo kala dambeeya, iyadoo la qorsheynayo in wax badan wanaagsan lagu soo kordhiyo. Wixii dheeraad ah ka ogow [district279.org/betterfuture](http://district279.org/betterfuture)



## **Xirfadaha laga helo Osseo Area Schools Ku soo biir kooxda Osseo Area Schools**

Ma raadinaysaa xirfad aad lacag ka samayso oo saameyn dhab ah kugu yeelan karto? Osseo Area Schools waxay bixiyaan goob shaqo oo shaqaynaya oo loo dhan yahay halkaas barayaasha iyo shaqaalaha la siiyey awood si ay u dhiirigeliyan ardayda, iskaashi la sameeyaan xirfadlayaasha heeganka u ah ayna u kobciyaan shaqsi ahaan iyo xirfad ahaanba. **Wax badan ka baro shaqooyinka la heli karo iyo sidaaad saameyn ugu yeelan karto [district279.org/careers](http://district279.org/careers).**

## **Ku xirnow Osseo Area Schools**



### **Warside - Newsletter**

279Connect waa wargeys todobaadle ah kaas oo waalidiinta, daryeelayaasha iyo xubnaha bulshada ku wargeliya wixii cusub ee muhiim ah, taariikhaha muhiimka ah iyo wararka iskuulka. Wixii dheeraad ah kala soco [district279.org/279-connect](http://district279.org/279-connect).

### **Baraha Bulshada Social Media**

@OsseoSchools

@OsseoSchools

@ISD279

@ISD279

Osseo Area Schools



# Diyaar ma u tahay inaad isqorto?

Warbixin muhiim ah oo ku saabsan is qorista Osseo Area Schools

## 1E Hubi inaad u qalanto

Marka hore, ka hubso in cunugaagu buuxiyo shuruudaha da'da looga baahan yahay. Carrurta soo galeysa xanaanada caruurga waa iney ahaadaan ugu yaraan shan sano jir ugu dambeyn Sept. 1-da sanadka is-qorista.

## 2 Hel Iskuulkaagal

Isticmaal qalabka helida iskuulka ee degmada, district279.org/find-my-school si aad u ogaato iskuulka u adeega ciinwaanka gurigaaga ama dooro mid ka mid ah iskuulada magnet-ka ama takhasuska ee degmada ama iskuulka online, 279Online.

## 3E Soo Gudbi Foomka Diiwaangelinta

Buuxi foomamka is-qorista ee laga heli district279.org/enroll. Sidoo kale waxaad soo buuxin kartaa foomka warqada ah waxaadna u diri kartaa xarunta diiwaangelinta, haddii aad dooneyso.

## 4E Soo gudbi Waraaqaha laga rabo

Soo gudbi caddeyn ta da'da cunugga (warqada dhalashada ama baasaboor), diiwaanka talaalada, iyo caddeyn ta degenaanshaha (sida biilka korontada ama heshiiska kirada).

## 5 Iskuulada Takhasuska ama Magnet

Haddii aad xiisneyaso inaad ilmahaaga ku qorto dugsi ama barnaamij magnet ah, fadlan marka hore ku dalbo Northwest Suburban Integration School District at nws.k12.mn.us. Markii lagu ogolaado, waxaad helaysaa tilmaamo ku saabsan dhameystirka nidaamka is-qorista.

## 6E Booqo Xarunta Diiwaangelinta

Haddii aad su'aalo qabtid ama aad u baahato cawinaad, xarunta diiwaan gelinta ee degmadu waxay diyaar u tahay inay kaa caawiso. Waxay kugu hagi karaan habka loo marayo ama waxay kaaga jawaabi karaan su'aalo iyo walaac kasta.

## 7 Astaynta Iskuulka

Marka codsiga cunugga ama dokumentiyada la dhamaystiro, degmada ayaa xaqijineysa iskuulka loo qoondeeyay ilmahaaga. Hadii aad codsatayo barnaamij magnet, waxaad heli doontaa wargelin dheeraad ah oo la xiriira aqbalaadda.

**Lix siyaabood oo kala duwan oo lagu soo gudbin karo dokumentiga is-qorista:**

1. **Online:** [district279.org/enroll](http://district279.org/enroll)
2. **Email:** [enrollmentcenter@district279.org](mailto:enrollmentcenter@district279.org)
3. **Fax:** 763-585-7368
4. **Mail:** Enrollment Center:  
7051 Brooklyn Boulevard,  
Brooklyn Center, MN 55429
5. **In-person:** 7:30 a.m.-3:30 p.m. (Mon.-Fri.)
6. **Dropbox** in lobby during non-business hours

## Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan iskuulada Takhasuska (Magnet)

- Codsiga Online: Soo buuxi oo soo gudbi codsi online ah bogga internetka ee Northwest Suburban Integration School District's website, nws.k12.mn.us. Barta codsashada wuxuu furmayaa bartamaha Oktoobar.
- Xilliga codsashada mudnaanta koowaad: Mudadda codsashada waxay bilaabantaa bartamaha Oktoobar. ilaa Dec. 31.
- Nidaamka Bakhtiyaa-nasiibka: Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka bakhtiyaa, booqo nws.k12.mn.us.
- Fursada Labaad: Barta codsiyada ayaa dib u furmaysa Jan., iyada oo la qaban doono bakhtiyaanasiib labaad bisha Maarsa.
- Mudnaanta walaalka: Haddii ilmahaagu leeyahay walaal dhiganaya dugsiga magnet aad doorato inta lagu jiro isla sanad-dugsiyeedka, codsiga waa in la gudbiyaa by waqtiga kama dambaysta ah ee mudnaanta si ay u kordhiyaan fursadaha ay kursiga ku helayaan.
- Gaadiidka: Gaadiidka lacag la'aanta ah waxaa heli kara Qaadista iyo keenista dhammaan dugsiyada takhasuska – magnetka- haddii aad ku nooshahay gudaha xafadaha iskuulada ee Anoka-Hennepin, Brooklyn Center, Buffalo-Hanover-Montrose, ISD728 (Elk River-Otsego-Rogers-Zimmerman), Fridley, Osseo ama Rockford.

Macluumaad dheeraad ah iyo caawimaadda is-qorista waxaad ka heleysaa xarunta is-diiwaangelinta. Email: [EnrollmentCenter@district279.org](mailto:EnrollmentCenter@district279.org) Phone: 763-585-7350 Website: [district279.org/enroll](http://district279.org/enroll)